**Amarka L. 13 ee 15 Agosto 1951**

**Xeerka Macdanta Dhulka Soomaaliya.**

## MAAMULKA WASAYADDA SOOMAALIYA EE TALYAANIGA

Markuu arkay xeerka 8 Febbraayo 1950, lamba. 12;

Markay Xeerka Madaxweynaha Jamhuuridda Talyaaniga ee taariikhda 31 Maarso 1950;

Markuu garowsaday baahida loo in la nidaamiyo baarista, daraasadda iyo beerista macdanta, si loo soo saaro xeerar ka jawaabaya xaaladda sharci ee Dalku ku jiro, laguna baddalo midkii r.d. 21 Febraayi 1938, lamba. 1422, kaaso hadda ka shaqeeya marka la eego amarka lamba. 5 ee 12 Abril 1950;

Markuu dhageystay talada Guddiga La-talinta Qaramada Midoobay;

Markuu dhageystay talada Golaha Dalka;

## WUXUU AMRAYAA

### Qod. 1

Waxaa la meelmariya lifaaqa Xeerka macdanta Dalka Soomaaliya, ee dhaqangalay taariikhda maantay ah.

### Qod. 2

Waxaa la tirtiray xeerarkii Xeerka macdanta PA.O.I oo lagu meelmariyay r. d. 21 agoosto 1938, lamba.1422.

### Qod. 3

Amarkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 15 Agoosto 1951.

Maamulaha

**Forlani**

**XEERKA MACDANTA DHULKA SOOMAALIYA**

**CINWAANKA 1AAD**

Baarista, Daraasadda iyo Beerista Macdanta

**Qod. 1**

Baarista, daraasaadda iyo beerista walxaxa macdantaa qaab kasta iyo xaalad kasta ha lahaadeen, biyaha diiran iyo kuwa macdaneed iyo tamarta dhulka hoostiisa ee loo adeegsan karo xagga warshadaha, dhulka Soomaaliya, waxaa nidaaminaya Xeerkaan.

**Qod. 2**

Maamulaha ayaa bixinaya:

a) Shatiga baarista, ee lagu sahminayo aag cayiman, isagoo khiyaar u leh in lagu sameeyo daraasad, sahamo qaabka dhulka iyo waxa oogadiisa ku sugan, sampallo laga soo qaado si baaris iyo tijaabooyin shaybaarka loogu sameeyo;

b) ruqsadda baarista, ee lagu hubinayo shaqooyin ku habboon, jiritaanka macdan waxtar leh, iyo keydka macdanta dabeecadda ay leeyihiin,

c) bixinta ruqsadda macdanta, waxay ku xirantahay kolba inta ay la egtahay dabeecadda keydka la xaqiijiyay, inta dhaqale ahaan si habboon laga filan karo.

**CINWAANKA 2AAD**

Qodadka Macdanta

**Cutubkaa 1aad**

Shatiyada Baarista

**Qod. 3**

Qofka doonaya in uu helo shatiga baarista, waa in uu codsi u soo qortaa Maamulaha, isagoo ku sheegaya:

a) magaca iyo naynaasta iyo meesha uu degganyahay;

b) aagga shatiga baarista loo weydiistay, isgoo ku soo lifaaqaya naqshadda cabirka dhuleed oo affar nuqula, halbeeg aan ka yareyn 1/100.000, haddi taasi aanay jirin, tilmaamo xudduud sugan;

d) walxaxa macadaneed ee guud ahaan sahanku ku saabsanyahay macdanta ama dareere batroolka, ama gaaska, biyaha macdanta leh ama diiran ama tamarta dhulka hoostiisa. Qofka ruqsadda la siiyay waa lagala noqon karaa haddii uu ka soo bixi waayay waajibaadki sharci ahaan la faray ee ruqsadda loo siiyay.

**Qod. 4**

Maamuluhu, marka uu dhagaysto Xaafiiska Farsamada arrintaas u xilsaaran marka wuxuu ku oggolaanayaa ruqsadda ama ku diidayaa go’aan aan laga doodi karin, sidoo kale waxaa lagala noqi karaa ruqsadda marka qofka la siiyay uu ka soo bixi waayo nidaamkii gaar ahaaneed ee ruqsadda lagu siiyay.

**Qod. 5**

Ruqsadda baarista waxay soconaysaa hal sano oo la cusboonaysiin karo, hasayeeshe qof kale looma wareejin karo. Arrintaas waxa lagu dabbaqaya amarrada qodobka 12aad.

Isla aaggaas waxa la siin karaa ruqsadda codasadyaal badan isla nooca baarista walaxa macdanka, kuwasoo midkasta aanu yeelanayn mudnaan gaara illaa uu cosado iyo helo ruqsadda daraasadda.

**Cutubka 2aad**

Ruqsadda Daraasadda

**Qod. 6**

Ruqsadda daraasadda waxaa lagu dhaqayaa isla xeerka qod. 3. Arjiga lagu dalbanayo ruqsadda waa in uu xitaa la socdaa tilmaamo cayiman ee walaxaha macdanta la doonayo in la baaro iyo sidoo kale dokumentiyada caddaynaya awoodda farsamo iyo dhaqaale ee codsadaha.

Arjiga waa in lagu soo lifaaqaa:

a) affar nuqul ee naqshadda aagga daraasadda lagu codsanayo;
b) warbixin farsamo oo ku saabsan isla aagga iyo barnaamijka la doonayo in la baaro.

**Qod. 7**

Wixii ku aabsan oggolaashaha ruqsadda, waxaa go'aan aan laga doodi karin ka gaaraya Maamulaha, marka uu dhagaysto talada Guddi farsamo oo sanadkiiba mar la magacaabo.

**Qod. 8**

Haddii uu jiro tartan ku saabsan codsiyada oggolaashaha daraasaadka helitannka ruqsadda agga lagu weydiistay baarista shaqooyinka la qabanayo, waxaa la abuuri karaa xilal/magac lagu kala dooran karo bixinta ruqsadda iyada ah.

**Qod. 9**

Rusqaddu waxay soconayaa muddo saddex sano.

Qolada ruqsadda la siiyay waxay xaq u leedahay in saddex jeer oo isku xigta loo kordhiyo; iyadoo mid waliba ay tahay laba sano, marka uu fuliyay qayb ka mida barnaamijkii hore iyo haddii uu gutay waajibaadkii kale ee ka imaanayay ruqsadda.

Haddii la helo macadanta ruqsadda loo siiyay iyagu waxay xaq u leeyihiin in loo kordhiyo oggolaashaha aagga u harsan muddo marka lagu daro tii hore aanu ka badnayn iskudarkooda toban sano.

Kordhin kasta waxaa lagu oggolaaanayaa Xeer Maamulaha, marka uu dhagaysta talada guddiga ku xusan qod.7aad, waxaana shardi ah oggolaashaha barnaamig gaara ahaaneed ee mid farsmo iyo maaliyadeed ee la xariira muddada shaqooyinka cusub.

Oggolaashaha daraasadda lama bixin karo aag ka badan saddex kun oo hektar.

Xaddidaadda agga laguma dabbaqi karo keydadka durdurrada iyo dareeraha batroolka (iskudarka hydrogiinka iyo ogsijiinka) iyo gaasaska dabiicaga.

Isla kuwa samaynaya daraasadda waxaa la siin karaa xitaa ruqsado daraasado badan aag u dhaw ama la darisa.

**Qod. 10**

Oggolaashaha daraasadda cid kale looma wareejin karo haddii aan oggolaasho laga helin Maamulaha.

Waa wax kama jiraan wareejinta kasta ee aan horay loo oggolaan marka loo eego dhinacyada iyo dhinaca Maamulkaba.

**Qod. 11**

Maamuluhu marka uu dhagaysto guddiga ku xusan qod. 7, wuxuu ku dhawaaqi karaa dhicitaanka mudada oggolaashaha, marka laga reebo xaaladaha ku yimaada xag Alle (forsa maggiore), haddii daraasadeeyuhu:

I) aanu ku qaban shaqooyinkii muddadii loo qabtay, ama haddii aanay jirin muddo cayiman, saddex bilood gudahood oo ka soo bilaabata maalinta oggolaashaha la siiyay;
II) uu joojiyo shaqadii wax ka badan lixbilood;
III) aan u hoggaansamin tilmaamihii ku qornaa oggolaashaha isaga ahaa, ama uu khilaafo amarrada ku qoran qod. 10 iyo 44 ee Xeerkaan.

Daraaasadeeyuhu sina xaq ugma laha abaalgudyo ama gunnooyin dhinaca Maamulka ama cilmi daraasedeeyaasha dambeeya.
Qaraarka ku saabasan dhaqan ka baxa ruqsadda cilmi barista waxa cabasha looga qaadan karaa guddi dhex-dhexaadin oo lagu dhisay qaabka ku xusan qod. 17.

**Qod. 12**

Dadka leh gacan ku haynta, oo ay ku jraan aagga dhulka daraasadda la oggolaaday, kama hor imaan karaan hawlaha daraasadda, marka laga reebo xeerka ilaalinta xasilinta macdanta ee Dalka ka jira.

Daraasadeeyuhu waxaa ku waajiba in uu magdhabo wixii dhibaatooyinka ka yimaada hawlaha daraasadda.

Milkiilaha dhulka lagu samaynayo darasadda wuxuu iqtiyaar u leeyahay in uu weydiisto dammaanad.

Haddii dhinacyadu ay heshiis ka gaari waayaan, qiimaha dammaanadda waxaa si ku meelgaara u gooynaya Madaxa Xaafiiska Farsamada u qaabilsan adeegyada macdanta, marka uu dhagaysto talada khabiir haddii loo baahdo.

Daraasadeeyuhu ma bilaabi karo hawlaha haddii aanu bixin damaanadda lagu xusay faqradda kore.

Muran kasta oo ka dhasha milkiilaha dhulka iyo daraasadeetha waxaa go’aan ka gaaraya hay’adaha garsoorka.

**Qod. 13**

Wixii ku siman xudduudka aagga dhulka ay khusayso ruqsadda daraasadda ama siismada, waxaa la siin karaa ruqsado daraasad kale, haddii ay ku saabsanyihiin walxo macdan ka duwan kuwii hore, marka hawlaha cusub aanay ka hor imaamayn kuwa la xariira ruqsaddii amafasaxa daraasaddii horay loo oggolaaday.

**Qod. 14**

Waxaa ka reeban daraasadeeyaha in uu sameeyo hawlaha beerista macdanta.
Sina laguma dhaqmi karo walxaha macdanta dhulka laga soo saaray haddii aan oggolaasho laga helin Maamulaha.

Hadiise keydka macdanta uu yahay wax xaddidan, ama qiima ahaan yaryahay, oo aanu u qalmin in loo adeegsado warshadayn dhab ah, hasayeeshe ay habboontahay in la dhoofiyo walxaha nacfiga leh ee jira, Maamuluhu, marka uu dhagaysto Madaxa Xaafiiska Farsamada u xilsaaran hawlaha macdanta, waxa uu u fasixi karaa daraasadeeyaha in uu wada isticmaalo keydka macdanta, isagoo u hoggaansamaya xeerarka gaarka ee kolba markasta loo jideeyo.

**Qod. 15**

Haddii Maamulku doonayo in uu si toosa daraasadda u sameeyo ama uu adeegsanayo urur hantiyeed isagu dhisay, laguma dabbaqayo xaddidaadda daraasadda aaagagga ku xusan qod. 9.

**Qod. 16**

Haddii barnaamijka uu ka mid yahay hawlo tixgalintooda leh iyo rakibaadda qalab, sida daraasdka dareeraha batroolka iyo gaasaska, waxaa lala geli karaa Maamulka heshiis gaara, marka la dhagaysto talada Guddiga ku xusan qod. 7.

Heshiiska waxaa lagu xusayaa shuruudaha ruqsadda lagu bixinayo iyo sidoo kale daraasadda keydka la helay inta daraaasaddu socotay.

Heshiiska waxaa lagu oggolaanayaa Xeer Maamulaha oo lagu soo saarayo si waafaqsan qodobka 22 ee soo socda.

**Qod. 17**

Maamulaha wuxu awood u leeyahay in uu ka noqdo ruqsadda haddii loo bahdo sababo la xariira danta guud.

Gunnada markasta waxaa lagu goynayaa qaraar uu soo saaro Maamulaha, si waafaqsan talada Guddiga ku xusan qod. 7.

Haddii gunnada aan la aqbalin waxaa go'aan aan racfaan lahayn ka gaaraya guddi dhex-dhexaadin, oo mid uu magaacabo Garsoore Soomaaliyeed oo xilka guddoomiyaha qabanaya, mid uu magacaabo Maamulaka iyo kan saddexaad oo uu soo magacaabo daraasadeeyaha.

**Cutubka 3aad**

Bixinnada Ruqsadda

**Qaybta 1aad**

Bixinta Oggolaashaha

**Qod. 18**

Qofkii doonaya in uu helo oggolashaha macdanta waa in uu codsi u soo qortaa Maamulaha, isagoo u hoggaansamaya xeerka qod. 6.

Macdanta waxaa beeri kara keliya qofka la siiyay oggolaashaha.

Isla aaagga waxaa laga bixin karaa ogglaashiyo badan, haddii ay ku saabsanyihiin macdan kala duwan, iyado tirada lagu darayo arrimaha ku xusan qod. 13.

**Qod. 19**

Ruqsadda macdanta waxaa la siin kara kuwa Maamulku u garto si aan muran ku jirin, marka uu dhagaysto talada Guddiga ku xusan qod.7, u qalmidda arrimaha farsamo iyo dhaqaale ee agaasinka.

Ruqsdo badan ayaa la siin isla hal qof.

**Qod. 20**

Daraasadeeyaha waxaa mudnaan gaara looga siin kara mid kale, haddii Maamulku u aqoonsado in uu leeyahay u qalmidda farsamo iyo dhaqaalaha looga baahanyahay.

Daraasadeeyuhu haddii aanu helin ruqsadda, wuxuu xaq u leeyahay abaalgud la xariirta ahmiyadda waxa la helay, iyo gunno ku saabsan waxaa laga faaidaysan karo.

Abaalgudka iyo iyo gunnada waxaa si ku meelgaara lagu goynayaa dekeretada ruqsadda.

Khilaaf kasta oo ka dhasha dhinacyada waxaa leh ikhtisaaska Hay'adaha garsoorka.

**Qod. 21**

Kharashka looga bahanyahay codsiga ruqsadda wuxuu saaranyahay codsadaha.

**Qod. 22**

Ruqsadda waxaa lagu oggolaanayaa Xeer Maamulha, marka uu dhagaysta talada Guddiga ku xusan qod. 7.

Xeerka ruqsadda waxaa ku jira tilmaamaaha:

a) magaca iyo naanaysta ruqsad la-siiyaha iyo meesha uu degganyahay, iyadoo la sheegayo ama ka dooranayo Dalka dhexdiisa;
b) ruqsaddu muddada ay soconayso;
c) dabecadda iyo xaaladda, fidinta iyo xadaynta godka macdanta;
d) caddadka xuquuda uu bixinayo ruqsad la-siiyaha sida uu qabo qod. 29;
e) caddadka abaalgudka ama gunno kale ee magdhaw ahaan loo siinayo ruqsad la-siiyaha sida uu qabo qod. 20;
f) dhammaan waajibaadka iyo shuruudaha laga doonayo ruqsad la-siiyaha;
g) wixii kale ka qaybgalka Maamulka ee faaiidada urur hantiyeedka;

Xeerka waxaa lagu soo lifaaqaya naqshadda iyo qoraalka xadaynta ruqsadda. Dekeretada waxa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya. Waana in iyada laga diiwangaliyaa Xaafiiska Rahanta.

**Qod. 23**

Dadka leh gacan ku haynta dhulka uu ku jiro wareegga ruqsadda kama horimaan karaan hawlgallada looga baahanyahay xadaynta isla ruqsadda, magacaabidd shuruudahaee shaqada beerista la xariira.

Ruqsad la-siiyaha waxaa ku waajiba in uu magdhabo wixii dhibaatooyin uu ku geysto shaqooyinka la soo sheegay.

**Qod. 24**

Haddii ruqsadda aan la siin daraasaeeyaha, ruqsad la-siiyahu muddo saddex bilood dhexdood oo ka soo bilaabata taariikhda la baahiyay Xeerka ruqsadda, waa in uu siiyaa daraasadeeyaha lacagta ruqsadda lagu sheegay dekereetda iyada ah taaso ah abaalgud ama gunno ama in uu fuliyo curaarta lagu tilmamay faqradda saddexaad ee qod. 40 isagoo keenaya caddaynta dokumentiga muujina in uu bixiyay curaarta.

Oofin la'aanta waajibaadka la soo sheegay waxaa ka ratimaya mudda dhaafka ruqsadda, uu Maamulku ku dhawaaqay.

**Qaybta 2aad**

Adeegsiga Ruqsadda

**Qod. 25**

Ruqsadda godadka macdanta waa ku-meelgaara, muddada jiritaankeeduna wuxuu ku kobanyahay waqtiga ku filan in ruqsad la-siiyahu uu ku heli karo magdhaw caddaaladeed iyo dayn-baxa raasamaalka lagu maalgeliyay daraasadda iyo beerista keydka macdanta, iyadoo la tixgalinayo xaaladaha xaqiiqa ahaan ka jira deegaanada.

Ruqsaddu sikastaba kama badanaan karto affartan sano.

Sikastaba marka la joogo muddada dhicitaaanka, Maamuluhu wuxu Xeer ku soo saari karaa go'aan aan laga murmi karin, marka uu dhagaysto guddiga ku xusan qod. 7, laba muddo kordhin ee isku xigta ayaa la samayn karaa, oo midkastaba ay soconaysa mudda aan ka badnyan tobon sano, haddi ruqsa la-siiyaha uu fuliyay barnaamijkii beeritaanka ee la xariiray waqtigii hore iyo haddii uu oofiyo waajibaadkii ruqsadda ka dhashay.

Xeerka waxaa lagu baahinayaa Faafinta Rsmiga ee Soomaalia sida uu qabo qod. 22.

**Qod. 26**

Godadka macdanta iyo waxyaaba la xariira waxaa lagu dhaqayaa xeerka nidaaminaya maguurtada.

Godadka macdanta waxaa la xariira dhismayaasha, qalabka gudaha iyo dibadda ku rakiban, ceelasha, waddada buurta ka dusta, makiinadaha, qalabaka iyo akabka godadka macdanta lagu beero, hawlaha iyo qalabka lagu naaxiyo iyo hagaajiyo beerista macdanta.

Diiwaangelinta rahanta waxaa shardi ah in Maamuluhu oggolaado.

**Qod. 27**

Waxaa loo tixgalinayaa maguurto ahaan alaabta la soo saaray, saadka iyo alaaddta sharraxaadda.

**Qod. 28**

Ruqsad la-siiyaha wuxuu habayn kara waxyabaha la socda walxa macdanta ruqsadda ay ku saabsantahay.

**Qod. 29**

Ruqsiyad la-siiyaha waa in uu siiyaa Maamulka khidmad sanadle ah oo lagu gooyo dekeretada ruqsadda, oo uu ku jiro masaaxada iyo xudduudka ruqsadda.

**Qod. 30**

Godada macdanta la baxshay waa in ay noqdaan kuwa shaqadoodu socoto.

Maamulka marka uu dhagatsto Xaafiiska farsamada u xilsaaran hawlaha godadka macdanta, sikastaba wuxuu hakin karaa hawlaha ama amri karaa in si talaaba-tallaaba ah loo fuliyo.

Ruqsad la-siiyaha waa in godadka macdanta ku beeraa qalabka farsamo iyo dhaqaale ahaan ku habboon marka loo eego ahmiyadda uu leeyahay godka macdanta isagoo u ballan qaadaya Maamulka habsami u socdka daayactirkiisa, xitaa inta lagu jiro muddada hakinta hawlaha.

**Qod. 31**

Oggolaanshaha lagama noqon karo ogolaansho hore la'aanteed, si lagu soo saaro wareegtada maamulaha. Dukumenti kasta oo aan lahayn oggolaanshaha hore ee aan korka ku soo sheegnay, waa buray oo waxba kama jiraan, xagga Maamulka iyo xagga dhinacyadaba.

**Qod. 32**

Haddii uu geeriyoodo ruqsad la-siiyaha, dhaxaltayadiisa waa inay saddex bilood gudahood marka la furo dhaxalka ay ku soo magacaabaan wakiil aqlabiyadda lagu sheegay qod. 1105 Xeerka Madaniga kaaso uga wakiil noqonaya dhammaan xiriirada sharci xagga Maamulka iyo dhinacyada saddexaad.

Muddadaas marka ay dhammaato, wakiilkaas waxaa xaafiis ahaan soo magacaabaya Garsoore Soomaliyeed, marka uu dhageysta Xaafiiska farsamada u qaabilsan godadka macdanta, iyadoo aan loo baahnayn in la dhagaysto kuwa danaha ka leh.

**Qod. 33**

Ruqsad la-siiyaha godka macdanta waa in uu bixyaa tirakoobka xog kasta iyo macluumaadka la weydiisto.

Sidoo kale waa in uu diyaariyaa saraakiisha iyo kuwa loo soo wakiishay qalabkasta oo lagama maarmaan u ah ilbaadinta.

Haddii loo diido, saraakiisha la soo sheegay, waxay maamulka weydiisn karaan caawimaadda loo baahanyahay.

**Qod. 34**

La wareegidda xuquuqda ruqsad la-siiyaha ee godka macdanta waxa codasn kara amaah-bixiyaasha rahanta.

Garsooridda la wareegidda iyo midka tallaab-tallaabada waxaa lagu qabanayaa si waafaqsan qodobada Xeerka Habka Madaniga.

Amarrada ku saabsan maguurtada wax xitaa la wargelinayaa Maamulaha.

Qiimaha mutaysiga soo hara marka la qanciyo amaah-bixiyeyaasha, waxaa la siinayaa ruqsad la-siiyaha.

Mutaystaha waxaa raacaya dhammaan xuquuqda uu lahaa iyo kuwa lagu lahaa ruqsad la- siiyaha ee lagu xusay dekeeretada iyo Xeerka jira, iyadoo markasta Maamuluhu ku go’aminayo mid aan laga doodi Karin, marka uu dhagaysto Guddiga lagu xusay qod. 7, oo leh shuruudaha lagu sheegay qod. 19

**Qod. 35**

Waxaa ku waajiba ruqsad la-siiyaha in uu magdhabo wixii dhibaatooyin ka yimaada hawlgallada godka macdanta.

Wixii la xariira dammaanadda, waxaa loo hoggaabsamayaa xeerka ku xusan qod.12.

**Qod. 36**

Wixii ku siman maageerka dhulka ruqsadda hawlaha looga baahanyahay keydinta, gaadiidka, qalabka wax lagu soo saarayo, iyo gudbinta tamarta iyo guud ahaan beerista macdanta, sidoo kale ammaanka godadka macdanta, waxaa loo aqoonsanyaa waxtar guud si buuxda xagga xeerka.

Haddii uu muran ka dhasho baahida iyo qaabka hawlaha la soo sheegay, waxaa go’aan ka gaaraya Xaafiiska farsamada ee qaabilsan adeegyada macdanta.

Marka hawlaha lagu soo sheegay faqradda koobaad ee qodobaan, ay tahay in ay ka dhacaan meel ka baxsan waregga jaantuuska ruqsadda; ruqsad la-siiyuhu wuxuu codsan karaa caddayn ku saabsan waxtarka guud sida uu xeerku qabo.

Caddayntaas waxaa samaynya Maamulha marka uu dhagaysto Xaafiiska Farsamada ee u xilsaatran macdanta.

Kuqsad la-siiyaha haddii uu codsado, Maamuluhu wuxuu amri karaa in si deg-degga loo dejiyo isagoo si ku-meelgaara u gaynaya gunnada isla markaana diyaarinaya curaarta.

**Qaybta 3aad**

Joogsiga Ruqsadda

**Qod. 37**

Ruqsaddu waxay joogsanaysaa:

a) marka muddadu ay dhammaato;
b) marka laga tanasulo;
c) marka uu mudda dhaaf uu dhaco;
d) marka laga noqdo.

**Qod. 38**

Ruqsadda dhacaday muddada ayaa loo kordhin kara sida uu qabo qod. 25.

**Qod. 39**

Ruqsadda haddii aan muddada loo kordhin, ruqsad la-siiyaha marka muddada ay dhammaato, waan in uu u soo gacangeliyaa Maamulka godka macdata iyo waxa la socda.

Ruqsad la-siiyaha wuxuu haysan karaa keliya, waxyaabaha uu u gooyay Madax Xafiiska farsamada ee qaabilsn godadka macdanta, waxyabaha looguu talagalya beerista macdanta oo laga sooci karo haddii aanay waxba u dhibayn isla godka macdanta.

**Qod. 40**

Marka muddada ay dhammato, godka macdantana cidda kale haddii la siiyay, wareejinta midba midkale ku wareejinayo waa in uu goob jog ka ahaadaa Madaxa Xaafiiska farsamada ee qaabilsan adeegyada godadka macdanta.

Ruqsad la-siiyaha cusub waa in uu u celiyaa kii hore qiimaha qalabka beerista, haddii uu doonayo in uu sii haysto.

Haddii la isku afgran waayo, Madaxa Xaafiiska farsamada ayaa si ku-meelgaara u go’aaminaya caddada lacagta loo celinayo, iyado loo kenayo Maamulka. Xaqasiintas liddigeeda dadka daneynaya waxay cabasho u qaadan karaan Hay’adaha garsoorka.

**Qod. 41**

Rahanta laga qoray godadka macdanta waxaa lagu xallinaya waxyaabaha iyo lacgta ruqsad la-siiyaha u sugnaaday.

Kaas waa inuu is-baraa horantii ugu yaraan hal bil amaah bixiyeyaasha ku qoran rahanta, maalinta ay dhacayaan hawlaha lagu wareejinayo Maamulka iyo ruqsad la-siiyaha cusub.

**Qod. 42**

Ruqsad la-siiyaha doonaya in uu ka tanasulo waa in uu caddayn nqoraala u geeyaa Maamulaha.

Tanasulidda wax shuruuda laguma xiri karo.

Laga soo bilaabo maalinta tanasulka, ruqsad la-siiyaha wuxuu noqonayaa ilaaliyaha godka macdanta, mana samayn karo hawlo beeris, waxna lagama baddali karo xaaladda si kastaba.

Madaxa Xaafiiska farsamada ee qaabilsan godadka macdanta, wuxuu hubinayaa xaaladaha uu ku suganyahay, wuxuna ku dhaqaaqayaa tallabooyinka ammanka iyo lagu xafidayo ee uu u arko lagama maarmaan.

Haddii aan loo hoggaansamin wuxuu amrayaa xaafiis ahaan waxqabad iyadoo kharaska la saarayo ruqsad la-siiyaha.

**Qod. 43**

Maamuluhu wuxuu ku dhawaaqayaa Xeerka marka uu dhagaysta Guddiga lagu xusay qod. 7, ee la xariiraha sababaha doodda ruqsad la-siiyaha, dhicitaanka muddada iyo marka ay jiraan xaaldo ku yimid xag Alle, milkiiluhu:

a) marka uu gudan waayo waajibdkii ku qornaa ruqsadda;
b) u hoggaansami waayo shuruudaha ku qoran amarrada ku qoran qodobada 29, 30 iyo 31;
c) si habboon aanu ku bilaabin hawlaha shuruudihii dekerretada lagu caddeyay, ama uu ka maqanyahay shardi si gaara loo sheegay, affar bilood gudahood oo ka bilaabata taariikhda la baahiyay Xeerka ruqsadda.

**Qod. 44**

Maamuluhu waxaa awood loo siiyay in uu Xeer kula noqdo ruqsadda, marka uu dhagaysto Guddiga lagu xusay qod, 7, haddii loo arko jiritaanka arrimo danta guud.

Isla Xeerka as waxaa lagu caddaynayaa, si ku-meelgaara gunnada u sugnaatay milkiilaha ruqsadda laga noqday.

Haddii aan la isku afgaran gunnada, waxaa go'an ka gaara guddi dhex-dhexaadin sida ku cad qod. 17.

**Qod. 45**

Xeerka lagu oggolaanayo tanasulka iyo midda lagu dhawaaqayo dhecitaanka ama ka noqoshada ruqsadda, waxaa lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga.

Iyaga waa in laga diiwangelinaya Xaafiiska Rahanta.

Laga soo bilaabo taariikhda Xeeroyinkaas waxaa laga dhaafaya ruqsad la-siiyaha xaqa u jidaynayo qod. 29 iyo waajibaadka Xeerka lagu sheegay Xeerka.

**Qod. 46**

Godka macdanta laga tanasulay, mudda dhaafay ama laga noqday mar kale ayaa la bixin karaa.

Ruqsad la-siiyaha cusub wuxuu xaq u leeyahay in uu isticmaalo hawlaha, aaladaha rakiban, qalabka qashin qubka iyo waxyaabaha la socda ee looga baahanyahay beerista godka macdanta, haddii uu waafaqsanyahay qiimaha ruqsad la-siiyihii hore sida uu qabo qod. 40. Isla xaaladdaaso kale wuxuu haysan karaa waxyaabaha loogu talagalay beerista oo laga sooci karo iyadoo aan waxyeello u geysanayn godka macdanta.

**Qod. 47**

Maamuluhu marka uu dhagaysto Guddiga ku xusan qod. 7, wuxuu bilaabi karaa bixinta ruqsad cusub ee godka macdanta laga tanasulay, muddo dhaafay ama laga noqday, xitaa haddi iyaga la rahmay, isagoo ruqsad la-siiyaha cusub ay raacayso waajibaadka aan horay looga hadlin ee ku saabsanaa dayntii la diiwaangashay isla markaana iyadoo la goynayo wixii dammaanad kale ee loo arko in ay dani ugu jirto dhinacyada saddexaad.

Marka laga joogo sanad diiwaangelint Xeerka lagu aqbalay tanasulka, mudda dhaafka ama ka noqoshada, amaahyaasha rahanta leh waxay dalban karaan xuquuqdooda, xitaa haddii muddada lagu heshiiyay aanay dhammaan, iyagoo ruqsaddo godka macdanta ku iibinay xaraasha, kuwaaso aan lagu qaban muddada lagu soo sheegay faqrdda la soo sheegay.

Marka xaaladdaaso kale qiimaha xaqsiinta la siinayo amaah bixiyaasha rahanta leh iyo kuwa mudnaanta leh, waxay u sugnaatay Maamulka.

Xaqsiinta waxaa lagu dabbqayaa xeerka faqradda dambe qod. 34.

Marka ay dhammaato muddada la soo sheegay, lagama keeni karo wax dacwada ruqsadda. godka macadanta, iyadoo Maamulka uu iqtiyaar u leeyahay in uu si xora u bixiyo ruqsad cusub.

Sidaaso kale, haddii iibka ama xaraashka aanay cidi soo doonan, godka macdanta wuxuu noqnayaa mid ka mdax bannan curaar, waxaana lagu bixin karaa ruqsad cusub ama loo fasaxo daraasad.

**CINWAANKA 3AAD**

Kaawooyinka

**Qod. 48**

Keydka walxaha macdanta, dhagxanta lagu dhiso saraha, jidadka iyo tamarta biyaha, marka laga reebo jayga laamiga, sibirka iyo kuwa dhuxusha jilicsan, waxay soo galayaan ulajeeddada xeerkaan, waxaana loogu yeerayaa magaca kaawooyin. Walxahaas waxaa yeelanaya milkiilaha dhulka iyo cidda kale ee xaq ku leh marka laga reebo xaddidaadda qodobada soo socda.

**Qod. 49**

Maamulku wuxuu dekereto ku soo saari karaa ruqsado ku-meelgaara, marka uu dhagaysto Xaafiiska farsamada ee qaabilsan adeegyada macdanta, dhulka demanyaalaha ee Maamulka raacasan ah ruqsado kaawooyin iyo foornooyin, xitaa ruqsado ku saabsan beero ama kuwa macdan, haddii markasta shaqooyinkaas aanay ka horimaanayn ruqsadihii horay loo bixiyay.

Cid kasta ruqsadda waxaa lagu siin karaa lacag laga qaado ama lacag la'aan iyadoo markasta la ilaalinayo shuruudaha gaara ee loo jideeyay.

Ballaarinta iyo muddada ruqsadda waxaa laguu sheegayaa ulajeeddada middaas lagu bixiyay.

Xeerka ruqsadda lagama diiwangelinayo Xaafiiska rahanta.

Maamuluhu wuxuu Xeer kula noqn karaa ruqsadda, marka laga reebo xaaladaha ku yimaada xag Alle, haddii aan la dheefsan ama aan shaqo laga qaban saddex bilood amse ruqsad la-siiyaha aanu u hoggaansamin shuruudihii ku qornaa Xeerka ruqsadda.

**Qod. 50**

Marka milkiiluhu aanu xilka la wareegin ama uu joojiyo hawsha beerista kaawada, amase aanu wax horumara ka samayn, Maaamuluhu marka uu dhagaysta Xaafiiska farsamada qaabilsan adeegyada macdanta, wuxuu goyn kara muddo lagu bilaabo, lagu sii wado iyo lagu dardar geliyo hawlaha.

Marka la soo dhaafo muddada loo qabtay ee aan la dheefsan, Maamuluhu wuxuu bixin karaa ruqsadda kaawada, isagoo u hoggaansamaya xeerka qodobka la soo sheegay iyo Cinwaanka II ee Xeerkaan.

Ruqsad la-siiyaha wuxuu siinayaa milkiilaha qiimaha qalabka rakiban iyo shaqooyinka la dheefsan karo, iyo qalabka diyaarka ah ee laga soo saaray kaawda.
Xuquqda u sugnaatay dhinacyada saddexaad waxaa lagu xallinayaa lacagta loo qoondeeyay milkiilaha iyadoo loo eegayo shuruudaha ku qoran faqradda la soo sheegay.

Waxaa lagu dabbaqayaa kaawooyinka amarrada qodobada 33, 36 iyo 40.

## CINWAANKA 4AAD

Qodobda Gunaanadka

**Qod. 51**

Ruqsad la-siiyaha hakiya hawlaha daraasadda ama beerista macdanta isagoo aan haysan oggolaashihii loo baahnaa, waxaa lagu ganaaxayaa lacag aan ka yareyn So.2.000, iyadoo ay u dheertahay in lala wareego qalabka la soo saaray.

**Qod. 52**

Ruqsad la-siiyaha aan samayn daayactirka joogtada ee godka mcdanta waxaa lagu ganaaxayaa lacag aan ka yarey So. 1.000, iyadoo aan waxu dhibayn magdhawga la siinayo Maamulka.

Ganaaxaaso kale waxaa la saarayaa ruqsad la-siiyaha khilaafa nuxurka faqradda qod. 33.

## CINWAANKA 5AAD

Xeeraka Guud iyo Kalaguurka

**Qod. 53**

Qofka aan haysan ruqsadda baarista, ama fasaxa daraasadda oo hela macdan ama haya macluumad la rumaysan karo, waa in uu qoraal ku soo wargeliyaa Guddoomiyaha gobolka deegaan ahaan iqtisaaska leh, isagoo tilmaamaya goobta ama dabeecdda, bixinayana wixii akhbaar kale ee laga weydiiyo.

Qofka ku sugan xaaladda lagu soo faqradda kore oo helo god macdan, wuxuu yeelanayaa mudnan gaara marka loo eego dhinacyda saddexaad in loo fasaxo daraasadda iyo ruqsadda macdanta, iyadoo markasta laga doonayo in uu wada haysto shuruudaha ku cad qod 19 ee xeerkaan.

Haddii aanu helin fasaxa daraasadda ama ruqsadda, isagu wuxu xaq u leeyahay in uu ka helo, midka fasaxa la siiyay ama kan ruqsadda la-siiyaha abaalgud iyadoo loo eegaya ahmiyadda waxa la helay, taaso lagu goynayo qaabka ku xusan qodobada 20 iyo 24.

**Qod. 54**

Codsiga ruqsadda waxaa lagu baahinayaa Fafinta Rasmiga ee Somaaliya.

Waxaa la siinayaa 60 cisho oo laga soo bilaabo baahinta, si is-hortaag looga keeno kaaso la geeynayo Maamulka.

Kanu waa in uu ahaadaa ogaysiis la siinayo codsadaha kaaso isaguna haysta 30 cisho oo uu kaga soo jawaabo.

**Qod. 55**

Wixii ku saabsan xeerarka ammaanka godadka macdanta, waxaa ka soo bixi doona xeer nidaamiye.

Illaa laga gaaro dhaqangalka xeer nidaamiyahaas waxaa loo hoggaasamayaa haddii la dabbaqo karo xeerarka 30 maarso 1803, lamba. 184 iyo xeer nidaamiyaha lasocda ee 10 Jannaayo 1907, lamba. 152 oo ku saabsan ammaanka godadka macdanta, kaawooyinka iyo dhulka xaabka qoyan.

**Qod. 56**

Ruqsadaha iyo oggolaashaha si sharci ah looga bixiyay Dalka Soomaaliya, waxay jirayaan illaa ay dhammaadaan muddada warqadda lagu bixiyay, markasta waa in aanay socon waayaan sabaaba la xariira mudda dhaafka.

Iyaga waxaa lagu dhaqaya Xeerkaan, waxkasta ha ahaadaaan xeerarka hadda jira, shuruudaha iyo qaababla lagu bixiyay.

Qod. 57.

Marka laga soo tago canshuur bixinta caadiga ee soo saaridda wax cusub ee ku saabsan maaddada mowduuca Xeerkaan ee dhexmara dhinacyo gaara, waxaa lagu dabbaqi karaa shatiyada, fasaxyada, oggolaashaha iyo dekeretooyinka kale ee la bixiyay si loogu fuliyo xeerka soo socda:

a) shatiga baarista ama fasax daraasadda walxaha macdanta, canshuur ah 15;

b) dekeeretada ruqsadda macdanta, xita haddii uu Maamulka ka qaybgalayo faaiidada urur hantiyeedka, canshuur ah So. 24;

c) oggolaashaha wareejinta fasaxa daraasadda walaxaha macdanta, canshuurta So. 360;

d) Xeerka oggolaashaha dadka nool ay isugu wareejinayaan ruqsadda macdaneed, canshuur ah So. 15;

e) oggolaashaha diiwaangelinta rahanta, canshuurta So. 15.

Canshuurta lagu soo sheegay qodobkaan waxaa loo qaadaya qaab caadi ah waxaana lagu haynaya meelkasta oo lagu qaado arrimaha canshuurta.

Muqdisho, 15 Agoosto 1951.

Maamulaha

**Forlani**